Rag ayaa si xaq daro ah ugu takri fala xoolaha Ilaahay, Naar ayey leeyihiin Maalinta Qiyaame

Khawla Alansaariya Allaha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inay tiri: waxaan ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Rag ayaa si xaq daro ah ugu takri fala xoolaha Ilaahay, Naar ayey leeyihiin Maalinta Qiyaame."
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in dad si xaq daro ah ugu tagri falaan Xoolaha Muslimiinta, ku waasoo xaq daro ku qaadanaaya, waa arimaha Xoolaha guud ahaaneed sida aruurintooda, in laga kasbo meel aan banaanayn iyo in lagu bixiyo meel aan sax ahayn, taas waxaa soo galaya cunida Xoolaha Agoonta, Xoolaha Waqafka ah, iyo Amaanada oo la inkiro iyo in Xoolaha dad waynaha xaqdaro lagu qaato. Ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in abaal marintoodu Naar tahay Maalinta Qiyaame.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5331